# HANNAANKA WAX-KA-BEDDELKA DASTUURRADA

W/D: QAREEN: SAKARIYE I. NUUR

# Hannaanka wax-ka-beddelka dastuurrada

**Noocyada Dastuurrada:**

**1. Dastuur qoran iyo mid aan qorneyn:**

Dastuurka qorani waa kan dhammaan qodobda iyo Mabaadi'ada aasaasiga ah lagu uruuriyay hal document ana book, sida dastuurka Soomaaliya.

**Dastuurka aan qorneyn**: waa kan aan lagu qorin hal dokuminti, hase yeeshee ku dhisan hida-dhaqanka iyo xeerarki hore ee bulshadas, sida Dastuurka Ingriiska.

2. **Dastuur la badali karo iyo mid aan si sahal ah lagu badali Karin:**

Dastuurka sida sahal ah lagu badali karo waa kan aan u baahneyn afti dadweyne, loona badali karo sida shuruucda kale ee dalka.

Dastuurka kakan ee aan sida fudud lagu badali karin waa kan u baahan afti dadweyne.

# Cont………….

- Dhammaan dunida dimoqoraadiga waxaa ku jira dastuurradeeda qodobbo nidaaminaya shuruudaha wax-ka-beddelka dastuurradooda.
- Hannaanka wax-kabeddelka loogu sameeyo dastuurraduna aad ayuu isugu dhaw yahay, waxaaba la oran karaa waa halbeeg caalami ah.
- Waxaa aalaaba jira habraac ka duwan kan loo maro wax-ka-beddelka xeerarka caadiga ah, iyada oo codka ansixinta xubnaha aad loo adkeeyo, waxaa dhici karta in wax-ka-beddelka dastuurka loo qaado afti dadweyne, sidaas darteed hannaanka wax-ka-beddelku waa kala duwanaan karaa kolka loo fiiriyo waddamada caalamka.

# Cont…………

- Habab kala duwan ayaa loo diyaariyaa wax-ka-beddelka waxaa dhici karta in qodobbada wax-ka-beddelka la qoro laguna daro dastuurka, iyada oo aan xeer ahaan loo qorayn.
- In hindise-sharciyeed ahaan loo diyaariyo kadibna uu noqdo xeer Baarlamaanka, si uu dhaqan-gal u noqdana wuxuu u baahan yahay habraac gaar ah. Tusaale Ireland iyo Australia kolka  Baarlamaanku ansixiyo wuxuu xeer noqon karaa marka ay afti ku meelmariyaan shacbigu.
- Waddamada qaar sida South Korea wax-ka-beddelka muhiimka ah ee lagu sameeyo dastuurku wuxuu la mid noqon karaa in la soo saaray dastuur cusub oo kale.

# Habraaca wax-ka-beddelka Dastuurka Maraykanka

- The United States Constitution is unusually difficult to amend. As spelled out in Article V, the Constitution can be amended in one of two basic ways. First, amendment can take place by a vote of two-thirds of both the House of Representatives and the Senate followed by a ratification of three-fourths of the various state legislatures or conventions(isku raacaan) in three-fourths of the states (ratification by thirty-eight states would be required to ratify an amendment today).

# Cont………

- **Tusaale:** Maraykanka waxaa la soo saaray Dastuurkiisa 1787, waxaana wax ka beddel lagu sameeyay 27 jeer oo keliya oo weliba 10 wax-ka-beddel oo ka mid ah la sameeyay 4 sano ka dib markii dastuurka la qoray, waxaana loo yaqaan(bill of rights). Madaxii caddaaladda(Chief Justice) ahaana Guddoomiyihii maxkamadda sare ee Maraykanka ayaa qoray 1800s: "***waxaa loo qoray dastuurka Maraykanka si uu u waaro, una jiro sanado badan".***
- **Su'aashu waxay tahay imise jeer ayaan u baahanay in aan wax-ka-beddel ku sameyno dastuurka federaalka ama kan dawlad goboleedka galmudug?**

# Sababaha wax-ka-beddelka dastuurka

- Maxay yihiin sababaha wax looga beddeli karo dastuurka? Maxaa sal u ah wax-ka-beddellada lagu sameeyo dastuurrada? Ma dano siyaasadeed? Ma dano shakhsi? Ma dan fog mise dan waqti dhaw?
- Sababta wax-ka-beddelku maku salaysan tahay dan iyo baahi bulshadeed? Maku salaysan tahay ilalainta iyo difaacidda xuquuqd muwaadin? Ma jirtaa baahi wada saamaynaysa dadka Soomalaiyeed ama dadka reer Galmudug oo dhan oo keenaysa in wax-ka-beddel lagu sameeyo dastuurka? Maxay tahay saamayn taban oo ay arrintaasi ku yeelan karto dalwadnimada iyo dimoqoraadiyada?

# Cont………………

1. Dastuurka Jappan weligiis wax-ka-beddel laguma samayn.
2. Dastuurka Australia waxaa la soo jeediyay wax-ka-beddel in ka badan 44 mar.
3. State ka la yiraa Alabama ee Maraynka, waxaa dastuurkiisa wax-ka-beddel lagu sameeyay 948  mar ilaa 1901.
4. Guud ahaan Maraynkan 27 jeer oo keliya.

# cont...............

Qod. 196 ee The Belgian Constitution: lama samayn karo ama lagu dhaqaaqi karo xilliyada dagaalka ama marka golayaasha xeer-dejinta laga hor istaago in ay si xor ah ugu kulmaan dhulka federaalka.

# Amendments of US Constitution

1. Protects freedom of religion, freedom of speech, freedom of the press, freedom of assembly and the right to petition the government.
2. Protects the right to keep and bear arms.
3. Restricts the quartering of soldiers in private homes.
4. Prohibits unreasonable searches and seizures and sets out requirements for search warrants based on probable cause.
5. protects the right to due process, and prohibits self-incrimination and double jeopardy.
6. Protects the right to a speedy public trial by jury, to notification of criminal accusations, to confront the accuser, to obtain witnesses and to retain counsel.
7. Prohibits excessive fines and excessive bail, as well as cruel and unusual punishment.
8. Abolishes slavery, and involuntary servitude, except as punishment for a crime.
9. Prohibits the denial of the right to vote based on race, color or previous condition of servitude

# DASTUURKII 1960

TITILE III: WAX-KA-BEDDELKA DASTUURKA

QOD. 104: Wax Ka Badelidda Iyo Wax Ku Daridda Dastuurka:Wax ka beddelidda ama wax ku daridda Qodobada Dastuurka waxaa go'aamin kara:

A) Golaha Baarlamaanka, soojeedinta ugu yaraan shan meelood meel(5/1) xubnahiisa ama

B) Xukuumadda ama;

C) 10,000 qof oo cod–bixiyayaal ah oo leh xaqa codbixinta.

D) Codbixinta waxaa la qaadayaa labo jeer oo isku xigtna oo ay u dhexeyso muddo aan yarayn seddex bilood. Ansixinta cod bixinta 1aad, waxay u baahan aqlabiyadda buuxda (absolute majority=50+1) ee xubnaha Golaha; halka codbixinta 2aad ay u baahan ansixinta seddax meelood laba meel(3/2) ee xubnaha.

# Xadka wax-ka-beddelka

- Sida uu dhigayo Qod.105(xadka wax-ka-beddelka):
- Wax-ka-beddelka Dastuurka ee Qodobka hore, ma saamayn karo qodobbada ku saabsan qaab-dhismeedka dawladda(qaabka demoqaraadiyadeed ee dowladda), xuquuqda iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee muwaadinka.

# DHAQN–GALKA DASTUURKA IYO AFTIDA:

1)- Waxuu dastuurkani si KMG ah u dhaqan–galayaa 1da Luulyo 1960, waxaana hal sano gudahii ee taariikhdan oo kale, loo gudbin doonaa afti shaacsan oo loogu yeeri doono dhammaan cod–bixiyayaasha in ay ka qayb–qaataan.

2)- Dhammaan cod–bixiyyaasha waxay xaq u leeyhihiin in ay muujiyaan dareenkooda oggolaanshaha ama diidmada dastuurka si hab xor, toos iyo qarsoodi ah oo waafaqsan sharci khaas ah oo loo sameynayo aftiqaadista.

# Cont………………..

3)- Nidaamsanaanta hawlgallada afti–qaadista waxaa xaqiijinaya Maxkamadda ugu sarraysa oo ku go'aamin doonto arrintan muddo aan ka yarayn toban beri, kana badnayn soddon beri ka dib marka ay xiranto doorashada. Maxkamadda ugu sarraysa waxay sidoo kale go'aaminaysa wixii cabasho ama racfaan kasta ee dhici kara in loo soo gudbiyo, iyadoo go'aanka noocani uu noqonayo kama dambays. Marka ay bixiso amarka sugitaanka, Maxkamaddu waxy sidoo kale shaaci–ka–qaadaysa natiijooyinka aftida.

# CONT……………

4)- Haddii aysan bixin sugitaan, afti cusub ayaa la qabanayaa muddo seddax bilood gudahood ah ee taariikhda go’aanka Maxkamadda.

# IV)- NATIIJOOYINKA AFTIDA:

- 1)- Hadii ay natiijooyink aftida liddi ku noqdaan dastuurkan, golaha Baarlamaanka waxay muddo shan iyo toban cisho gudahood ah, ee marka ay Maxkamadda ugu sarraysa shaaca ka qaaddo natiijooyinka, ku dooranayaan Madaxweyne cusub oo KMG ah ee Jamhuuriyadda, waxayna ku dhawaaqayaan in kii hore aanu sii hayn doonin xafiiska; xubnaha Goluhu ka koobma waxay isla markaasba amar ku bixinayaan in la sameeyo dastuur cusub oo loo gudbin doono in afti loo qaado lix bilood gudahood oo xigta magacaabidda Madaxweynaha cusub ee KMG.
- 2)- Haddii ay natiijooyinka afti–qaadista noqodaan oggol, waxaa dastuurkan loo qaadanayaa kama damays, waxayna golaha Baarlamaanka, muddo 15 beri gudahood ah, ku soo dooranayaan Madaxwaynaha Jamhuuriyadda si waafaqsan dastuurkan.

# V)- QODOBKA UGU DAMBEEYA:

1)- Ilaa shaaca laga qaado natiijooyinka afti–qaadista, qoraalka qodobada ee dastuurka waxaa lagu dhejinayaa golayaasha iyo marinada magaalooyinka iyo xafiisyada gudoomiyayaasha degmooyinka dalka si uu muwaadin kasta u fahmo una garto.

2)- Waa in dhammaan qaybaha dowladda/dalka iyo dadka ku hoos jira Qaranimadiisa oo idil ay si daacadnima ah u ilaaliyaan in dastuurku yahay sharciga asalka ah ee Jamhuuriyadda. Dastuurka oo ku naqshadaysan shaabadda qallalan ee dowladda, waxaa lagu darayaa kaydka rasmiga ah ee sharciyada iyo dekereetooyinka Jamhuuiyadda Soomaaliya.

# DASTUURKII 1979

**Qod.112aad ( Wax ka bedelka Dastuurka ):**

1.Talo wax ka beddel Dastuurka waxaa soo jeedin kara:

- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya;
- Golahadhexe ee Xisbiga iyo;
- Sadded meelood meel Xildhibaannada Golaha Shacbiga.

2. Golaha Shacbiga wax ka bedelka Dastuurka wuxuu gudoominayaa go'aan ay isku raacaan, sadex meelood meel xubnihiisa.

3. Wax ka bedelka Dastuurka ma saaameyn karo arrimaha soo socda:

a)Nidaamka Jamhuuriyadnimadda ee Dalka.

b) Doorashada mabda'a Hantiwadaaga.

t) Midnimada Dhulka.

j)Xuquuqda iyo xorriyadaha asaasiga ah ee Muwaadinka iyo Qofka.

# DASTUURKII 1990

**MADAXA SADDEXAAD: WAX-KA-BEDDELKA DASTUURKA**

Qod. 118aad: Wax-ka-beddelid iyo kabid

1. Talo wax-ka-beddel ama kabid dastuur, waxan soo jeedin kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda. Xukuumadda ama saddex meelood meel Xildhibaannada Golaha Shacbiga ama toban kun oo muwaaddin oo leh xaga doorashada.

2. Wax-ka-beddelka iyo kabidda Dastuurka waxaa go'aaminaya Golaha Shacbiga, waxaana loo qaadayaa laba cod oo ay u dhexcyso ugu yaraan muddo saddex bilood ah. Codka hore wuxuu ku ansaxayaa hal-dheeri Xubnaha Golaha Shacbiga, midka labaadna saddex meelood laba.

# CONT………….

Qod. 119aad (Xodka-wax-ka-beddelka):

Wax-ka-beddelka Dastuurka ee Qodobka hore, ma saamayn karo arrimaha so socda:-

a) nidaamka Jamhuuriyadnimada ee dalka;-

b) midnimada dhulka;

l) xuquuqda iyo xorriyaadka asaasiga ah ee muwaaddinka iyo qofka.

# DASTUURKA KMG

Madaxa Koowaad: Waxka Beddelka Dastuurka

Qodobka 132aad. Qodobada ku dabaqma wax ka beddelka Dastuurka ee lasoo jeediyay dhammaadka xilliga koowaad ee Baarlamanka Federaalka:

(1) Marka laga soo tago faqradda (2), ka hor ama ka damba inta aanu dhammaan muddo xileedka koowaad ee Baarlamanka Federaalka, Midkoodna Labada aqal ee Baarlamaanka ma soo jeedin karo wax ka beddelka Mabaadi'da aasaasiga ah ee ku xusan cutubka 1aad ee dastuurkan,

(2) Iyadoo shardi ahaan la eegayo Qodobka 1aad, isla markaana laga reebayo wixii isbeddel ah ee lagu sameynayo xuduudaha maamul goboleedyada marka la eego qodobka 49aad, Aqal ka mid ah Baarlamaanka Federaalku waxaa uu soo jeedin karaa wax ka beddelka Dastuurka habka ee ku sugan qodob hoosaadyada iyadoo la raacayo nidaamka ay dhigayaan faracyada Qodobbada (3) ilaa (9).

# Cont……………..

(3) Dawladda Federaalka ama tan gobolada, xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka ama codsi ay saxiixeen ugu yaraan 40,000 oo muwaadiniin ah ayaa lagu bilaabi karaa habraaca wax ka beddelka .

(4) Cidda u doodeysa wax ka beddelka Dastuurka hab waafaqsan faqradka (2) waxay soo jeedin karaan nooca wax ka beddelka ay rabaan iyaga oo hor keenaya mid ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka.

(5) Haddii badiba xubnaha aqalka wax ka beddelka la soo jeediyay ee Dastuurka la horkeenaya ay aqbalaan wax ka beddelkaas marka koowaad ama marka xigta ee ay akhriyaan, guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamanka Federaalka ee Soomaaliya waxa uu mid kasta magacaabayaa 10 xubnood oo aqalkiisa ka tirsan oo ka mid noqdaguddi wadajir ah oo ka kooban labada aqal.

# Cont……………………

(6) Guddiga wadajirka ah ee lagu magacaabay hab waafaqsan faqradda 5 waxay --

(a) Dib-u-eegis ku samayn doonaan soo jeedinta ku saabsan wax ka beddelka;

(b) Dadka ku wargalin doonaan soo jeedinta ;

(c) Hubin doonaan in ay jirto fursad dad weyne oo ku filan in lagaga doodo;

(d) La tashan doonaan xubnaha dadwaynaha;

(e) Hubin doonaan in xubnaha dadwaynuhu helaan fursad ku filan oo ay ugu soo bandhigi karaan faalooyinkooda iyo soo jeedinahooda guddiga wadajirka ah; iyo

(f) Kala shaqeyn doonaan sharci-dejinta maamul goboleedyada xubnaha ka ah federaalka iyo in lagu daro wixii maamul goboleedyadu soo gudbiyeen oo la is-waafajiyay soo jeedinta wax ka beddelka , goorta arrini taabanayso danaha gobolka.

# Cont………

(7) Laba bilood gudahood markii la magacaabay, guddiga wadajirka ahi waxay warbixin u gudbin doonaan midkasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah.

(8) Baarlamaanka Federaalku waxaa uu aqbalayaa wax ka beddelka la soo jeediyay kaliya intii lagu ansixiyay cod kama danbaysa ka dib codkaasoo ay u qaadeen ugu yaraan sadex meelood laba meelood xubnaha jira aqalka shacabka, iyo cod kama dambays ah oo ay u qaadeen ugu yaraan sadex meelood laba meelood xubnaha jira ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.

# Cont……..

(9) Aqalka Baarlamaanka, waxa uu cod kama dambays ah u qaadi karaa sadex bilood iyo kabadan marka ay ka soo wareegto warbixinta Guddiga wadajirka ah sida uu dhigayo faqradda (7).

(10) Haddii baarlamaanku ansixiyo hal iyo ka badan oo waxka beddelada la soo jeediyay ah hab waafaqsan qodobkan iyo qodobka 136 ee khuseeya dibu eegista Dastuurka kama dambaynta ah, waxa loo qaadi doonaa afti dastuurka wax ka beddelka lagu sameeyey.

# Cont……….

Qodobka 136aad. Qaadashada wax ka bedelka Dastuurka inta lagu guda jiro muddo xileedka koowaad ee Aqalka Shacab; ansixinta Dastuur kama dambays ah:

(1) inta lagu guda jiro muddo xileedka koowaad ee Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya, baarlamaanka Federaalku waxaa uu qaadan doonaa waxkabeddelka la soo jeediyay ee Dastuurka ku meel gaarka ah kaliya intii lagaga ansixiyay kadib cod kama dambays ah aqalka shacabka codkaasoo u dhigma sadex meelood laba meelood , iyo cod kama dambaysa ah oo ay u qaadaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah, codkaas oo ugu yaraan ah sadex meelood laba meelood xubnaha jira.

(2) Afti la qabtay taasoo khusaysa Dastuurka ku meel gaarka ah wax laga bedelay, oo la qabto dhammaadka mudada xilka ee koowaad ee Golaha Shacabka, codbixiyayaasha jamhuuriyadda Soomaaliya waxa ay ku qaadan karaan Dastuurka cusub cod aqlabiyad ah oo ay ku taageeraan wejiga kama dambaysta ah ee Dastuurkan.

# Cont…………..

Qodobkaan waxaa lagu laalay wax-ka-beddelka farsamo ee dastuurka.

Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama Baarlamaankaas xilligiisa uu dhammaaday.

# Qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka

**Qodobka 154aad: Wax-ka-bedelka Ama Kabidda Dastuurka**

1. Wax-ka-bedelka ama kaabidda Dastuurka waxaa soo jeedin kara:

 a. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

 b. Saddex Meelood meel (1/3) tirada Guud ee xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka;

 c. Saddex Meelood Meel (1/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka;

 d. Ugu yaraan mid ka mid ah Dawlad-gobleedyada;

 e. Codsi ay saxiixeen ugu yaraan 50,000 codbixiyaal diiwaangashan ee Jamhuuriyadda Federal Soomaaliya.

2. Waxaa waajib ah in soo jeedinta wax ka bedelka ama kaabidda Dastuurku ay sababaysan tahay isla-markaana ay saxiixaan dhinacyada soo gudbiyay.

# Cont…………..

3. Wax-ka-beddelka ama kaabidda qodob ama qodobada Dastuurka ee ay soo jeediyeen dawlad-goboleedyada inta aan la horgayn Baarlamaanka Federaalka waa in marka hore la soo marsiiyaa Goleyaasha Wakiilada Dawlad Goboleedyada soo jeediyay ayna ku ogolaadaan soo jeedintaas boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1).

4. Lama oggola wax-ka-beddelid kasta oo la soo jeediya ee la xiriira mabaadi'da asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sida ku cad Qodobbada (1), (2), (3) iyo (4) ee Dastuurka Federaalka.

# Cont……………

5. Waa in Gole kasta oo ka tirsan labada Gole ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya uu ku ansixiyaa soojeedinta wax ka beddelka Dastuurka boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1) ee Aqal kasta inta aan la bilaabin doodda wax-ka-beddelka Dastuurka.

6. Wax ka beddelka qodob ama qodobada Dastuurka waxay ku meel-maraysaa, marka uu gole kasta ku ansaxiyo seddex meelood labo meel (2/3) codka xubnihiisa.

7. Haddii Baarlamaanka Federaalka uu laalo soo jeedinta wax ka beddelka ama kaabidda Dastuurka, waxaa reeban in soo jeedintaas dib loogu soo celiyo ilaa ay ka soo wareegto muddo hal sano iyo bar ah.

# Cont…………

8. Marka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalku uu ansixiyo soojeedinta wax ka beddelka ama kaabidda Dastuurka ayna Maxkamadda Dastuurka xaqiijiso ansaxnimada wax ka beddelka Dastuurka, waxaa xeer Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

# Cont……………..

- Qodobka 157aad: Dhaqangalka dastuurka iyo Aftida(Waxaa lagu mideeyay qodobkaan qodo.137, 141 ee asalka Dastuurka ee ka kala hadlayay dhaqan-galka Dastuurka iyo Aftida)

1. Wax-ka-beddelka lagu sameeyay Dastuurka KMG ah waxa uu dhaqan-galayaa marka uu ansaxiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Lana marsiiyo Maxkamadda Dastuurka.

2. Dastuurka wuxuu si ku-meel-gaar ah u ahaanayaa dhaqangal ilaa inta Muwaadiniinta Soomaaliyeed ay ku ansixinayaan afti dadweyne(faqrad cusub).

3. Waxaa reeban in afti dadweyne loo qaado wax ka beddelka Dastuurka ama Kaabidda inta laga sugayo midnimada dhuleed iyo midda dadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya(faqrad cusub).

# Dastuurka Galmudug

Qodobka 71aad: Ansaxinta iyo wax-kabedelka Dastuurka DGGM

1. Ergada Golaha ansaxinta ayaa si kumeelgaar ah u ansaxineysa Dastuurka DGGM.
2. Golaha sharci-dejinta ayaa awood u leh wax ka bedelka dastuurka:

a) Qodobada ku xusan Cutubka Kowaad iyo Cutubka labaad ee xuquuqul insaanka, wax ka badalkooda waxa uu u baahnayahay Afti dadweyne.

b) Qodobada wax ka beddelidda Dastuurka waxaa soo jeedin kara afar meelood meel golaha sharci-dejinta, waxaana ansixinaya labo meelood meel hal dheeri ah ee xubnaha Golaha sharci-dejinta ee DGGM. Marka laga reebo qodobada ku xusan xarafka (a) ee qodobkaan.

c) Golaha sharci-dejinta DGGM waxkabadalka qodobada dastuurka ay ku sameyso sida ku xusan Qodobka 71-aad faqradda 2-aa (b), waxaa loogu dhaqmayaa si kumeelgaar ah inta dastuurka afti dadweyne looga ansaxinayo.